



# Ma u safraysaa meel ka baxsan Australia?

## Lacagbixinta markaad wadanka ka maqan tahay

Si aad u hesho lacagtaada ama kaarka dhimista markaad Australia ka maqan tahay, waxaa waajiba inaad buuxiso shuruudaha xaq u yeelashada lacag bixin walba ama kaarka dhimista.

Iyada oo ku xiran lacagbixintaada ama kaarka dhimista, waxaa jira shuruuc kala duwan oo la xiriirta siday kuu saamaynayso uga safrida Australia dibada. Markaad ka baxdo Australia, lacagbixintaada ama kaarkaaga lacag dhimista waa isbedeli doonaa ama waa joogsan doonaa iyada oo ku xiran shuruucdaas. Macluumaadka ugu dambeeyey oo ku saabsan lacag bixinta iyo kaarka dhimista markaad wadanka ka maqan tahay booqo: [humanservices.gov.au/paymentoverseas](https://humanservices.gov.au/paymentoverseas)

Eeg websaytka ka hor inta aadan dhoofin ama wac **131 202** si aad ugula hadasho qof afkaaga ku hadlaya wixii ku saabsan xaalladaada gaarka ah.

## Noo sheeg wixii ku saabsan isbedelka duruufkaada

Waa muhiim inaad nala socodsiiyo wax kasta oo isbedel ah oo ku saabsan duruufkaada kaas oo caadiyan saamaynaya lacagbixintaada ama kaarka lacag dhimista markaad wadanka dibada uga maqan tahay, sidii aad samayn lahayd haddaad wadanka joogto. Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay inaad noo sheegto haddii isbedel ku dhacay xaalka guurkaaga.

## Sidaad noogu sheegayso wixii la xiriira socdaalkaaga

Sida ugu sahlan oo aad noogu sheegi karto safarkaaga waa inaad isticmaasho akoontigaaga Centrelink ee online-ka ah adoo ka gelaya myGov. Waxaad ku dari kartaa, ka arki kartaa, ka cusboonaysiin kartaa ama ka saari kartaa faahfaahinta online-ka ah waqti walba.

Iska diiwaangeli akoontigaaga Centrelink ee online-ka ah adoo ka gelaya myGov ka hor inta aadan ka dhoofin Australia si aad si sahlan noogu sheegto qorshaha safarkaaga kuna hesho warqadahaaga iyo adeegyada kale ee online-ka ah inta aad maqan tahay.

Wasaarada socdaalka ee Australia ayaa tala siin doonta markaad Australia ka tagto.

Haddii aadan haysan akoontiga myGov, ka samayso akoontiga **my.gov.au** kuna xir Centrelink akoontigaaga myGov adiga oo dooranaya 'Services' ka dibna link icon Centrelink agtiisa. Waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay inaad ka jawaabto su'aallaha qaarkood si aan ula xiriirino diiwaankaaga akoontigaaga myGov.

Haddii aad doorato inaad ka diiwaangeliso nambarka moobaylkaaga myGov, xaqiiji inaad ku hesho fariimo nambarkan intaad dibada joogto.

## Helida Medicare intaad Australia dibada ka joogto

Ma awoodi doontid inaad hesho adeega Medicare intaad dibada joogto. Haddii aad jirato, waxaa laga yaabaa inaad bixiso dhamaan daaweyntaada. Haddii uu jiro isdhaafsi caafimaad Reciprocal Health Care Agreement wadanka aad aadayso, waxaa laga yaabaa in aadan waxba bixin. Heshiiskaasi wuxuu daboolaa kharajka daawada lagama maarmaanka ah oo deganayaasha Australia oo u safraya wadamada qaarkood, loomana qorshayn inuu bedelo caymiska caafimaadka safarka gaarka ah ee dadka dibada u safraya.

Haddii aad aadayso wadan heshiis lala leeyahay, sii qaado kaarka Medicare-ka. Dabadeed haddii aad u baahan tahay daaweyn caafimaad, waxay sahlayaa habka la marayo.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan Reciprocal Health Care Agreements (heshiiska Daryeelka Caafimaadka la-is-dhaafsado), kuwaas oo ay ku jiraan haddii Australia ay leedahay wadanka aad u safrayso, booqo [humanservices.gov.au/rhca](http://humanservices.gov.au/rhca)

## U dirida ama qaadashada daawadaada dibada

Waa sharci daro inaad u qaadata ama u dirto daawo dibada Pharmaceutical Benefits Scheme meel Australia ka baxsan oo aan ahayn waxaad naftaada u isticmaalayso ama isticmaalka qof kula safraya.

Waxaad helli doontaa macluumaadkii ugu dambeeyey ee ku saabsan lacagbixintayada iyo adeegyada markaad dibada jirto, sida Medicare, waxaadna ka hellaysaa [humanservices.gov.au/australiansoverseas](http://humanservices.gov.au/australiansoverseas)

Ka hubi websaytka ka hor intaadan safrin ama wac **131 450** (TIS National) si aad noogula hadasho luqadaada wixii ku saabsan Medicare iyo u qaadashada daawooyinka dibada.

## Macluumaad intaas ka badan

- Gal [humanservices.gov.au/yourlanguage](http://humanservices.gov.au/yourlanguage) halkaas oo aad ka akhriyi karto wixii ku saabsan, ka dhegaysan karto ama ka daawan karto fiidiyow luqad afkaaga ku hadlaysa.
- wac **131 202** si aad noogula hadasho afkaaga wixii la xiriira lacagbixinta Centrelink iyo adeegyada
- wac **131 450** (TIS National) si aad noogala hadasho wixii la xiriira adeegyada iyo lacagbixinta Medicare iyo Child Support
- Booqo xarunta adeega.

**Ogeysiin:** Qiimaha wicitaanka gurigaaga aad ka wacayso nambarka 13 meel kasta oo aad Australia ka joogto waa qiimaha halkaad joogto. Qiimuhu waxaa laga yaabaa inuu isbedelo iyada oo ku xiran bixiyaha adeega telefoonka, iyo moobaylka waxayna keeni karaan lacag aad u badan.

## Afeef

Macluumaadka xaashidaani wuxuu ahaa xaqiiq bishii April 2016.



# Are you travelling outside Australia?

## Payments while outside Australia

To get your payments or concession card while outside Australia, you must continue to meet the eligibility requirements for each payment or concession card.

Depending on your payments or concession card, there are different rules on how travelling outside Australia may affect you. When you leave Australia, your payments or concession cards may change or even stop based on these rules. For the most up-to-date information about payments and concession cards while you are overseas visit [humanservices.gov.au/paymentsoverseas](https://humanservices.gov.au/paymentsoverseas)

Check the website before you travel or call us on **131 202** to speak to someone in your language about your specific circumstances.

## Tell us about changes to your circumstances

It is important that you advise us of any change to your circumstances that would normally affect your payments or concession card while you are overseas, as you would if you were in Australia. For example, you need to tell us if there are changes to your relationship status.

## How to tell us about your travel

The easiest way to tell us about your travel plans is to use your Centrelink online account through myGov. You can add, view, update and remove your overseas travel details online at any time.

Register for a Centrelink online account through myGov before you leave Australia so you can easily tell us about your travel plans and access your letters and other services online while you are away.

Australia's immigration department will also advise us when you leave Australia.

If you don't have a myGov account already, create a myGov account at [my.gov.au](https://my.gov.au) and link Centrelink to your myGov account by selecting 'Services' and then the link icon next to Centrelink. You may need to answer some questions so we link the correct record to your myGov account.

If you choose to register your mobile number with myGov, make sure you can receive messages from this number while overseas.

## Accessing Medicare while outside Australia

You will not be able to access Medicare services while overseas. If you get sick, you may have to pay for all your medical treatment. If there is a Reciprocal Health Care Agreement in place with the country you're going to, you might not have to pay for some things. These agreements cover the cost of essential medical treatment for Australian residents travelling in some countries, and are not designed to replace private travel health insurance for overseas travel.

If you are going to a country with an agreement, take your current Medicare card with you. Then, if you need medical treatment, it can make the process easier.

For more information about Reciprocal Health Care Agreements, including if Australia has one with the country you are travelling to, visit [humanservices.gov.au/rhca](http://humanservices.gov.au/rhca)

## **Taking or sending your medicines overseas**

It is illegal to take or send Pharmaceutical Benefits Scheme medicines out of Australia that are not either for your personal use or the use of someone travelling with you.

You will find the most up-to-date information about our payments and services while overseas, including Medicare, on [humanservices.gov.au/australiansoverseas](http://humanservices.gov.au/australiansoverseas)

Check the website before you travel or call **131 450** (TIS National) to speak to us in your language about Medicare and taking medicines overseas.

## **For more information:**

- go to [humanservices.gov.au/yourlanguage](http://humanservices.gov.au/yourlanguage) where you can read about, listen to or watch videos with information in your language
- call **131 202** to speak to us in your language about Centrelink payments and services
- call **131 450** (TIS National) to speak with us in your language about Medicare and Child Support payments and services
- visit a service centre.

**Note:** call costs from your home phone to a 13 number from anywhere in Australia are the cost of a local call. Charges may vary depending on the telephone service provider, and mobiles may incur a higher charge.

## **Disclaimer**

Information in this factsheet is accurate as at April 2016.